SMITTSKYDDSBLAD

Patientinformation

ESBL-carba bildande bakterier

Översättning till somaliska

Version 2024-04-18

# Bakteeriyo samaysa ESBL-carba, macluumaadka bukaanka

## Waa maxay sababta aan anigu u helay macluumaadkan?

Tijaabooyin lagaa qaaday ayaa waxay muujiyeen inaad leedahay bakteeriyo adkaysi (adkaysi badan) u leh antibiyootigga. Warqaddan macluumaadka ku qoran waxaad ka akhrisan kartaa warbixin dheeraad ah oo ku saabsan macnaha ay leedahay iyo waxa ay tahay inaad ka fikirto si aadan dadka kale u qaadsiin.

## Waa maxay bakteeriyada samaysa ESBL- carba?

ESBL-carba macnaheedu waa Extended Spectrum Betalactamas med karbapenemas-aktivitet. Waa maaddo ku jirta bakteeriyada qaar oo sababta inay u adkaysato antibiyootikada qaarkeed.

Bakteeriyada samaysa ESBL-carba waxay ku jiri kartaa mindhicirka iyada oo qayb ka ah bakteeriyada caadiga ah ee mindhicirka taas oo aan lagu jirran. Taas waxaa loo yaqaan inuu qofku ahaado side. Sida bakteeriyada caadiga ah, ayey bakteeriyada samaysa ESBL-carba waxay mararka qaarkood keeni kartaa caabuqyo, sida caabuqyada kaadi mareenka oo kale.

Bakteeriyada leh ESBL-carba ma sababto caabuq ka badan ama ka khatarsan bakteeriyada caadiga ah, laakiin marka la daaweynayo nooc ka mid ah caabuqa waxaa loo baahan yahay in la isticmaalo noocyo gaar ah oo antibiyootik ah.

## Sidee ayaa bakteeriyada samaysa ESBL-carba loo kala qaadaa?

Bakteeriyada samaysa ESBL-carba waxay dadku isku qaadsiin karaan gacmaha oo wasakhaysan oo leh bakteeriyada mindhicirka, tusaale ahaan marka musqul laga soo baxo ka dib. Waxa sidoo kale lagu kala qaadi karaa cuntada iyo biyaha.

Qofka ah mindhicir ku sidaha bakteeriyada samaysa ESBL-carba oo keliya waa dhif iyo naadir inuu faafiyo cudurka. Xaaladaha qaarkood xaddiga bakteeriyadu way korodhaa waxaana sidoo kale kordha khatarta ah inuu caabuqu faafo. Taas waxaa loo yaqaanaa xaalado halis u ah faafidda cudurka.

Xaaladaha halista u ah faafidda caabuqa waxay noqon karaan tusaale:

- shuban
- Tuubooyin ama caloosha oo lafuro
- nabarro furan.

## Ma ka tegi kartaa bakteeriyada samaysa ESBL-carba qofka?

Way kala duwanaan kartaa iyadoo ay qaadan karto bilo ilaa sannado inta uu qofku mindhicirka ku sidayo bakteeriyada ESBL-cabra Lama sheegi karo inta uu qofku sidayo bakteeriyada, laakiin dadka intooda badan waxay ka tagtaa wakhti ka dib. Caadi ahaan looma baahna in la kaantaroolo saxarada qofka oo shaybaarka la geeyo.

## Maxaan ka fikiraa si aanan dadka kale u qaadsiin?

Tan ugu muhiimsan ee aad samayn kartaa waa inaad si taxadder leh u nadiifiso gacmaha. Haddii aadan lahayn xaalado halis ah markaa khatartu way yar tahay inaad cudurka faafiso markaa si caadi ah ayaad dadka kale wakhti ula qaadan kartaa. Sidoo kale sida aad caadi ahaan galmada u sameyso ayaad samayn kartaa. Waxaad u shaqayn kartaa sidii caadiga ahayd. Carruurtu waxay aadi karaan dugsiga xannaanada iyo iskuulka waxayna ka qayb qaadan karaan aktiifiteetyada dhammaantood.

### Nidaamyada nadaafadda adiga kuu gaarka ah marka aad leedahay xaalado halis ah

Haddii aad leedahay xaalado halis u ah inaad faafiso caabuqa, markaa waxa kordhaya khatarta faafida caabuqa. Markaa waa inaad ka fikirtaa arrimaha soo socda:

- Xaqiiji inaad si fiican u dhaqdo gacmaha. Isticmaal shukumaan iyo alaabada musqusha oo adiga kuu gaar ah.
- Ha kula dabaalan barkadaha wakhti ay dadka kale ku dabaalanayaan.
- Ku duub meelaha nabarrada ah faashado oo beddel faashaddaha haddii ay qoyaan.
- Haddii ay kugu xiran yihiin tuubooyin/kateeter, waa inaad gelisaa dharka hoostiisa.
- Dhaq gacmahaaga markaad taabato nabarro, dhaymo ama tuubooyinka kadib .

### Miyaan u baahanahay inaan dadka kale u sheego inaan ahay side?

Uma baahnid inaad u sheegto dadka kale ee kaa agdhow inaad tahay side bakteeriyada ay samayso ESBL-carba.

Haddii aad u baahato in lagugu daweeyo antibiyootig, aad bay muhiim u tahay inaad hesho antibiyootik sax ah. Intaan lagu daaweyn ka hor, waxaa sidoo kale loo baahan yahay in bakteeriyo yar meesha laga soo gooyo si loo beero. Sidaa awgeed annagoo adiga kuu danaynayna, waxaanu kaa codsanaynaa inaad u sheegto dhakhtarkaaga inaad tahay qof sida bakteeriyada samaysa ESBL-carba.

Haddii isbitaalka lagu dhigo, qalliin laguugu sameynayo ama aad degto hoy gaar ah, way fiicantahay inaad u sheegto dhakhtarkaaga inaad siddo bakteeriyada samaysa ESBL-carba.

## Raad-raacidda faafitaanka cudurka

Sida uu qabo sharciga ilaalinta caabuqyada faafa, waa inaad ka qayb qaadataa raad-raacidda faafitaanka caabuqa. Taas macnaheedu waa inaad bixiso macluumaad si shaqaalaha daryeelka caafimaadku ay u qiimeeyaan goorta, meesha iyo sida loo malaynayo inaad cudurka ku qaadday iyo haddii laga yaabo inaad dad kale qaadsiisay.

Waxa aad sheegto waa sir (qarsoodi) dadka aad ka sheekayn doontaana ma ogaan doonaan qofka aad tahay.

## Warqad ku saabsan ka hortagga cudurrada faafa

Warqadda ka hortagga cudurrada faafa waxaa soo saaray Ururka caafimaadka ka hortagga cudurrada faafa waxayna khuseeyaa heer qaran.